# Guri ka Saarida

Evictions

## Ma wajahaysaa guri ka saarid?

Hadii aad khatar u tahay in guri lagaa saaro, waa inaad markiiba caawimaad heshaa. Hadii qolada gurigu ay jaa kaa xareysatay dacwo guri  ka saarid ah, maxkamada ayaa kuu soo diri warqadaha dacwada. Warqadaha maxkamada ee guri ka saarida waxaa la yiraa Maxkamad uga yeerid iyo Ashtako. Maxkamad uga yeerida iyo Ashtakaddu waxay kuu sheegaan kolka iyo goorta dacwadaada la qaadayo. Waxay koloo kuu sheegaan haddii dacwadaada la qaadi adigoo xaadir ah ama adigoo khadka ku jira. Haddii aad hesho warqada maxkamad uga yeerida iyo ashtakada ah ee guri ka saarida, warqadan xogta aruursan ahi waxa ay ka hadashaa waxyaabo aad u baahan inaad ogaato.

## Haddii dacwadayda la qaadi anigoo xaadir ah, ma u bedeli karaa dacwo khadka lagu qaado?

Haddii u Yeerida iyo Ashtakaddu ay tiraa waxaa laguu qabtay dacwo adigoo xaadir ah la qaadayo, waxaa aad xaq u leedahay inaad codsato dacwo khadka lagu qaado. Taa macnaheedu waa waxaa laga yaabaa inaadan u baahan inaad maxkamadda tagto.

Maxkamada waxa ay haysaa tilmaamaha iyo foomamka (instructions and forms) lagu waydiisto dacwo khad ku qaadida. Siddoo kale waxa aad soo wici kartaa maxkamadda ama waxa aad kala hadli kartaa qareen sidda loo codsado maxkamadda khadka lagu qaado.




**Hel talo dhanka sharciga ah markiiba.** Hadii aad danyar tahay, wac xafiiska gargaarka sharciyada (legal aid) ee 1-(877) 696-6529. Waxa aad ka heli kartaa khayraadyo badan, xafiisyada gargaarka sharciga (legal aid) iyo caawimaado kale khadka (online) ka ee: www.lawhelpmn.org/so. Uma baahnid qareen si aad uga dagaalanto guri ka saarid, laakiin haysashada qareeni waa ay ku caawin. Waa inaad taqaan sharciga iyo xaquuqdaadda.

**Waqtigii laguu qabtay tag dacwada dhagaysigeeda.** Haddii aad soo daahdo dood la'aan ayaa dacwada lagaaga adkaan. Tag qaadida dacwada xataa haddii aadan haysan wax aad isku difaacdo aadna is leedahay waa lagaaga adkaan dacwadda. Haddii aad tagto waxa aad ka codsan kartaa maxkamadda in lagu siiyo ilaa iyo 7 cisho oo aad ku guurto haddii uu rafaad ku haysto.

**Tag dhagaysiga dacwada xataa hadii ay qolada gurigu ku tiraa uma baahnid inaad tagto!** Haddii aadna tagin, dood la'aan ayaa dacwadda lagaaga adkaan.

**Ikhtiyaar: Buuxi Foomka Jawaabta.** Degmooyinka qaarkood, wax waa ay caawin kartaa in la buuxsho warqad foomka jawaabta. Wac xafiiska gargaarka sharciyada (legal aid) ee 1-(877) 696-6529 si aad u ogaato inay tahay inaad ka xareysto jawaab qoraal ah degmadaadda iyo in kale. Waxaa aad ka heli kartaa foomka jawaab-celinta maxkamada deegaankaaga ama khadka (on-line). Si aad u hesho foomka Jawaabta gal www.mncourts.gov.



→ Riix "Forms & Instructions" *(Foomamka & Tilmaamaha)*
→ Riix "Housing / Landlord-Tenant" *(Guryaha/Qolada Guryaha)*
→ Riix "Somali - Eviction Answer / Jawaabta Tillaabada Ka-saaridda"

La imow 3 nuqul (copies) oo ah Jawaabtaada Maxkamada. Sii 1 nuqul qolada guriga, 1 na xaakimka, 1 na adigu haysto.

**Hadii lacag lagugu leeyahay,** keen **dhamaan** lacagta oo dhan maxkamdda, iyo **waliba** khidmada la soo daahida ah ee lagugu leeyahay, khidmada dacwad xareysiga ee qolada guriga gashay iyo khidmada adeega. Dacwo xareysigu waxa ay u dhaxeysaa $280 ilaa $400 iyadoo hadba ku xiran degmada. Khidmada adeegu waxa ay u dhaxeysaa $30 ilaa iyo wax aad uga badan – laakiin, waa inay noqotaa wax macquul ah. Waxaa dhici karta maxkamadu inay ku siiso ilaa iyo 7-cisho dacwada dhagaysigeeda ka dib si aad u bixiso khidmadaha, laakiin waa inaad codsataa. Waxaa kale oo lagaa rabi karaa inaad haysato dhamaan lacagta kirada ah oo dhan. Waxaad kaloo keeni kartaa ballan-qaad ama warqad aad ka keento hay'ad ballan-qaadayso inay siiso lacagta qoladda guriga.

**Hadii aad kirada u haysato sabab ah dhibaatooyin hagaajin la'aan ah awgood,**
Waxaa dhici karta inay khasab noqoto inaad ku bixiso lacagta kirada oo **dhan** maxkamada. Karaaniga maxkamada ayaa haynaya lacagta inta uu xaakimku ka gaarayo go'aankiisa. Hadii aad u dhiibto lacagta kirada ah karaaniga maxkamada, waa inay lacagtu noqotaa cadaan ama jeega sugan (certified check) kuna qoran magaca "District Court Administrator. " Uma baahnid inaad bixiso khidmada dacwo xareysiga ama khidmada la soo daahida. Waydiiso maxkamada inay amarto guri hagaajinta ayna kuugu soo celiso qaar ka mid ah lacagta kirada sababta ah inaad waqti ku noolayd guriga oo ay dhibaatooyin ka jiraan.



**Isku day in heshiis lagu dhameeyo arrinta.** Ka hor ama waqtiga qaadida dacwadda, eeg inaad la gaari kartid heshiis waanwaan ah qoladda guriga aad uga jirto. Hadii lacag kiro ah lagugu leeyahay, isku day inaad tartiib-tartiib u bixiso. Hadii aad heshiis gaartaan, ha noqdo mid qoraal ah. Hubina in adiga iyo qoladu gurigu aad saxiixdaan. Maxkamadana keen heshiiska maalinta dacwada la dhagaysanayo. Waydiiso maxkamadu inay ansaxiso. Ha u goyn maxkamada, xataa hadii aad arrinta waanwaan ku dhamaysaan. Qolada gurigu maxkamada waa ay tagi kartaa, hadii aadan joogin adiguna xaakimku waxaa dhici karta inuu amro

guri ka saarid. Waa inaad sidoo kale aad isku daydaa in diiwaanka maxkamada kiiska laga tirtiro (masaxid) taa oo qayb ka ah heshiiska.

**Hadii maxkamadu ay amarto dhexdhexaadin, diyaar u ahow iyana.** Maxkamadaha qaarkood, waxaa jooga dhexdhexaadiyeyaal isku daya inay adiga iyo qolada guriga ka caawiyaan inaad kiiska heshiis ku dhamaysaan. Hadii aad heshiis gaartaan, waxa uu noqon doonaa mid qoran si adiga iyo qolada guriguba aad u saxiixdaan. Heshiisku waxa uu qayb ka noqon doonaa amarka xaakimka waana mid ku qaban kara adiga. Ka fakar wixii aad jeclaan lahayd inuu kiiskaagu ku dhamaado ka hor inta aadan maxkamad tagin si kolkaa aad diyaar u ahaaho lacala hadii dhexdhexaadin la aado. Ha ogolaan sameynta wax aadan samayn karin ama aadan sameyn doonin. Heshiiska kama noqon kartid maxkamada ka dib. Haddii aadan u hogaansamid heshiiska, guriga waa ay kaa saari karaan.



**Guri ka saaridu badanaa waxa ay kuu gali diiwaankaaga.** Kiisaska guri ka saarida ahi kaa kuwa cid walbaa arki karto. Shirkadaha soo baarida kireystayaasha waxa ay soo sheegi karaan wixii guri ka saaritaan hore ah ilaa iyo 3-sanno ama ka badan. Haddii kiis guri ka saarid ah lagaaga guulaysto, waxaa dhici karta inay adkaato in lagaa tirtiro kiiskaa (masaxid). Wixii kale ee akhbaar ah ee ku saabsan tirtirida ka eeg warqadayada xogta aruursan ee *Tirtirada Guriga Ka Saarida*.

## Ma leedahay qorshe bixinta lacagta ah ama qorshe guuritaan?

Haddii adiga iyo qoladda aad guriga uga jirtaa aad ku heshiisaan qorshe lacag bixin ah ama qorshe guurid ah, waydiiso maxkamadda inay kiiska ka dhigto mid qarsoodi ah ilaa iyo inta qorshahu uu ka dhamaystirmayo.

**Waydiiso maxkamada in ay ka tirtirto kiiska diiwaankaaga.** Tirtirida macnaheedu waa ka masaxida diiwaaanada dadweynaha kiiska. Kuwaani waa duruufaha kolkaa ay khasabka ku tahay in maxkamaddu ay tirtidho dacwada guri ka saarida ah:

- Kiraystahu uu ku guulaysto kiiska
- Maxkamaddu ay baabi'say dacwadda guri ka saarida sabab kastaba ha u baabi'see
- Qoladda guriga iyo kiraystahu ay ku heshiiyaan tirtiraad
- 3 sanno ka dib dacwadda guri ka saarida
- Haddii kiraystahu uu ka oo baxay shuruudahii heshiiska waanwaanta ah *uuna* kiraystahu u soo gudbiyo codsi tirird dacwada ah maxkamadda.

Haddii kiisku uusan ku banaanayn midna noocyadda kor ku xusan, wali waa aad waydiisan kartaa maxkamadda inay kaa tirtirto dacwadda guri ka saarida ah. Si aad ugu hesho tirtiraad waxyaabo aan kor lagu xusin, maxkamaddu waa inay go'aamiso in:

- Tirtiradu waa "ay cadahay inay tahay maslaxada cadaaladda," iyo in

- “maslaxada cadaaladdu” aysan ka cuslayn “maslaxada guud ee ah ogaanta diiwaanka.”

Maxkamadu waxa ay tirtiri kartaa guri ka saaridaada kaliya hadii xaakim uu is yiraa qolada gurigu waa ay ku khaldanayd inay xareysato dacwada, ayna xaq-darro tahay in looga tago diiwaankaaga. Tusaaleyaal arrintaa ahi waxa ay noqon karaan:

- warqadaha maxkamada si sax ah laguuguma keenin
- aadan helin ogaysiis ah in dacwo guri ka saarid ah la xareysanayo 14 cisho ka hor intii aan dacwadda guri ka saarida ah la xareyn
- qolada gurigu waxa ay tiri ma aad bixin kiro, laakiin waxa aad cadeysay inaad bixisay
- qolada guriga inay kugu colaadinayso (aar goosanayso) ashtako ku saabsan hagaajimo
- qolada gurigu waxa ay tiri waxa aad jabisay liiska, laakiin aad cadeysay inaadan jabin
- Inaad ahayd kireyste ku jira guri bangi la wareegay, laakiin aadan helin waqti ogaysiin ah oo quman oo aad ku guurto.

Eeg warqadayada xogta aruursan ee, *Kolka Qolada Guriga Aad uga Jirto lagala Wareego Guriga: La Wareegida Guriga iyo Joojinta Qandaraaska Guri kala Gadashada*.

**Tirtirida kiiska waa wax muhiim ah in lagu daro heshiiska xal helida ah.** Marmar badan qoladdu gurigu waa ay ogolaataa tirtirida kiiska haddii aad sameyso wax walba oo aad ku balan qaaday inaad ku sameyn doonto hesiiska xal helida ah – sida ka guurida ama bixinta dhamaan lacagta waqtigii loo qabtay in la bixiyo.
Haddii qoladda gurigu aysan ku ogolaan dacwo tirtirid heshiiska waanwaanta ah, waxa aad adiga gaar u waydiisan kartaa Maxkamadda arrintaa. Ka eeg warqadayadda Xogta Aruursan, *Tirtirida Guriga ka Saarida.*

## Difaacyada Badanaa loo Isticmaalo Guriga ka Saaritaanada

### Waa maxay waxa la yiraa “difaac”?

Waa aad arki kartaa waxa kiiska qoladda gurigu uu gabi ahaanba ku saabsan yahay adigoo eegaya Ashtakada. Difaacyadda guri ka saaridu waa sababo sharci ah oo la cuskado si in loo buriyo kiiska. Waxa aad u sheegi kartaa maxkamada waxa difaacaagu yahay adigoo u sheegaya xaakimka ama adigoo maxkamada ka xareysnaya foomka Jawaab-celinta. Calaamadi sababaha quseeya xaaladaadda. Qaarka mid ah difaacyada inta qaalibka la isku difaaco ayaa hoos lagu xusay.

### Helida Ogaysiiska Guri ka Saarida (Ogaysiis 14-Cisho ah)



- Qoladda guriga aad uga jirtaa waa inay ku siiso ogaysiis 14 cisho ah ka hor inta aysan xareysan dacwo guriga ka saarid ah.

- Ogaysiisku waa inuu qoraal yahay. Waa khasab in qof keeno ama boostada darajada 1 aad ah la soo dhigoo.

- Qoladda gurigu waa khasab inay ku lifaaqaan ogaysiiska ashtakadda guri ka saarida ah.

- Ogaysiisku waa khasab inuu lahaado waxyaabahan:
  – Cadadka guud ee lacagta ee la iska rabo
  – Waxyaabo jabay oo khaaska ah oo u baahan in wax laga qabto
  – Magaca iyo ciwaanka qofka u qabta kiradda iyo khidmadaha qoladda guriga
  – Oraahda soo socota: "Waxa aad xaq u leedahay inaad raadiso caawimaad dhanka sharciga ah. Haddii aadan awoodin inaad qareen qabsato, caawimaad dhanka sharciga oo bilaasha ah ayaa la heli karaa. La xiriir xafiiska Gargaarka Sharciyadda (Legal Aid) ama booqo barta www.LawHelpMN.org si aad u ogaato xaquuqdaadda aadna u hesho xafiiska Gargaaradda Sharciyada (Legal Aid) ee deegaankaaga."
  – Oraahda soo socota: "Si aad u dalbato caawimaad dhaqaale, la xiriir maamulka degmadda deegaankaaga ama xafiiska adeegyadda bulshadda ee Qabiiladda, ku dalbo caawin khadka (online) ee barta https://mnbenefits.mn.gov/ ama wac khadka akhbaarta ee bilaashka ah ee  hay'adda United Way adigoo garaacaya 2-1-1 ama 800-543-7709"
  – Oraahda soo socota: "Qoladda gurigu waxa ay xareysan karaan dacwo guri ka saarid ah haddii aadan ku bixin cadadka guud ee lacagta la iska rabo ama aadan ku guurin 14 cisho gudahood laga bilaabo maalinta ogaysiiska aad hesho. Qaar ka mid ah dowladaha hoose ee deegaanaddu waxaa dhici karta inay leeyihiin muddo ogaysiiska guri ka saarida oo ka badan 14 cisho."

Waxa aad dalban kartaa in kiiska la baa'biyo ama la tirtiro soo "xareyn naaqus ah awgeed" *(deficient filing)* haddii:

- aysan qoladda gurigu ku siin ogaysiiskan
- ogaysiisku uusan lahayn wax walba oo kor lagu xusay, ama
- qoladda gurigu ay xareysato dacwo guri ka saarid ah ka hor inta mudadda 14-cisho ahi aysan dhamaan

## Helida warqadaha maxkamada (geynta) *(Service)*



- Sharciga Minnesota waxa uu dhigayaa in qolada gurigu ay khasab tahay inay kuugu keenaan warqadaha maxkamada qaab cayiman. Hadii qolada gurigu aysan kuugu keenin warqadaha maxkamada adiga qaabka saxda ah, waxa aad ka codsan kartaa maxkamada in kiiska la tuuro lana tirtiro (masaxid).

- Qolada gurigu waa khasab inay maxkamada ka xareystaan warqad oranaysa sida ay kuugu keeneen warqada maxkamada. Warqadan waxaa la yiraa adeega dhaarta (affidavit). Waa in lagu

xareeyaa ugu yaraan 3 cisho ka hor dacwo qaadidda. Hadii aadan ka helin nuqul (copy) warqada adeega dhaarta (affidavit). Waa inaad waydiisaa karaaniga maxkamada inuu ku tuso.

- Qolada gurigu waa inay raacaan talaabooyinka si ay kuu siiyaan dukumiintiyada maxkamada:
  1. Marka ugu horeeysa, waxa ay isku dayaan inay waqadaha maxkamada gacanta kaaga kenaan. Waa inay isku dayaan ugu yaraan 2 goor oo kala duwan. Hal mid oo isku dayida ahi waa inay u dhaxeeysaa waqtida 6 FIIDNIMO ilaa 10 FIIDNIMO. Dhib ma leh hadii qolada gurigu ay u dhiibo warqadaha qof kale oo gurigaa ku nool, laakiin qofkaasi waa inuu noqdaa qof jira da' uu ku fahmi karo warqadaha. Hadii warqadahan qaabkan laguugu keenay, "Adeegii" waa la sameeyey.

  2. **Waxa cusub 2025**, haddii qoladda gurigu ay si joogta ah kuugu la soo xiriirto aalad koronta ah [sidda emayl ama dhambaal (text)], **siddoo** kale waa inay kuugu soo diraan warqadaha maxkamadda adiga siddaa. Kuwaa waxaa ku jirta u yeerida iyo ashtakada iyo ogaysiiska dacwo qaadidda. Waa inay u xareeyaan warqad kale oo ku dhaarasho (affidavit) tan.

  Laakiin haddii qoladdu gurigu aysan ku heli karin ama aysan kuu keeni karin warqadaha kolkaa, qolada guriga waa inay maraan talaabooyinkaa oo dhan:

  1. Qolada gurigu waa inay maxkamada ka xareysaa waxa la yiraa "dhaarta la waayaha."
  2. Qolada gurigu waa inay boostada kuu soo dhigtaa warqadaha maxkamada adiga iyagoo kuugu soo hagaajinaya ciwaanka lagaa hayo.

  3. Kolka ay boostada kuu soo dhigaan ka dib, waa inay maxkamada ka xareeyaan "dhaarta Boosto u dhigida" ee oronaysa in ay warqadaha maxkamada kuu soo direen.

  4. Kolkaa qolada guigu waa inay tagtaa ciwaankaaga ayna ku dhajiyaan warqadaha maxkamada albaabka.

  5. Qolada guriga kolkaa ka dib waa inay xareysato "dhaarta ku dhajinta" maxkamada.

- Waa khasab inaad hesho warqadaha maxkamada ugu yaraan 7-cisho ka hor maxkamada.

Hadii qolada guriga aad ugu jirtaa aysan u hogaansamin mid ka mid ah xeerarkaa adeega, waxa aad maxkamada ka codsan kartaa in kiiska la tuuro lana tirtiro.

## Kirada iyo Khidmaaha (Bixin La'aanta Kirada)



- Waxaa dhici karta inaadan ogolayn kirada lagugu leeyahay inta ay tahay. Waa khasab inaad cadeyso cadadka lagugu leeyahay. Hadii aad haysato wax rasiidyo ah, la imow maxkamada.

- Hadii ay jiraan dhibaatooyin hagaajin la'aan ah. Waydii maxkamadu inay kaa yareyso kirada. La imow cadeyn dhibka ah, warbixinada fatashayaasha, sawiro, makhraatiyaal. La imow cadeymo sheegaya in qolada gurigu ay ogayd dhibaatada. Xasuusnow, xaakimyada intooda badani ma ay dhagaystaan difaacan hadii aadan la imaan maxkamada **dhamaan** lacagta kirada ah ee lagugu leeyahay.

- Waxaa dhici karta inaadan ogolayn khidmadaha qolada gurigu kugu soo dalacayso. Fiiri liiskaaga si aad eegto khidmadaha ku qoran. Khidmadaha ah lacagta badan ee la soo daahida kiradu sharci ma aha. Xataa hadii ay ku qoran yihiin liiska. Khidmaha la soo daahida lacagta waxaa lagu xadiday inaysan ka badnaan karin 8% ee kirada aan la bixin bishaa.

- Hadii qolada gurigu ay qaadato qayb kirada lagugu leeyahay ah, waxa ay ka tanaasuli karaan (faraha ka qaadi) xaqooda ay guriga kaaga saari kiro bixin la'aanta awgeed. Laakiin waxaa dhici karta in liiskaaga ay qoran tahay inaysan dhib ahayn in qolada gurigu ay qaadan karto qayb kirada ah ayna wali guriga kaa saari karto. Ka hubi liiskaaga arrintaa.

- Marmarka qaarkood maxkamadu waxa ay ku siin waqti siyaado ah oo aad ku bixiso kirada ama khidmadaha. Waydiiso 7-cisho sharaxna sababta aad ugu baahan tahay waqtigaa.

## Ogaysiiska Guurida ("Sii Joogida" Ka Dib Ogaysiiska Guri Banaynta ah)

Hadii aadan jabin liiskaaga, kiradana la bixiyo, qolada gurigu waa inay kuu soo dirtaa ogaysiis qoran oo quman oo guurid ah. Hadii ogaysiiska aan adiga lagugu siin qoraal ahaan muddada waqtiga quman ah, taasi waxay kuu noqon difaac.

- Hadii aad haysato liis, waxa uu dhigi inta uu yahay waqtiga "ogaysiiska qumani." Hubi ka dibna maxkamada la imow.

- Xataa hadii aadan haysan liis qoraal ah, qolada guurigu waa inay ku siiso ogaysiis qoran oo ah ugu yaraan hal bil iyo hal maalin ka hor waqtiga guurida. Tusaale ahaan, hadii qolada gurigu ay rabto inaad adigu ka baxdo bisha Juun 30 keeda, waa khasab inaad hesho ogaysiis qoran ka hor Maajo 31 keeda. La imow ogaysiiskan maxkamada.

- Qolo guri lahi kuma siin karto ogaysiis ka guurid ah hadii ay tahay aarsi sababtu. Taa macnaheedu waa isku dayga inay kugu colaadiyaan wax. Tusaale ahaan, haddii aad ugu wacdo fatashaha guryaha hagaajin awgeed ayna 90-cisho gudahood ay qoladda gurigu ku siiso ogaysiis guurid ah, waxay u eg tahay kolkaa taasi aarsi.

- Hadii qolada gurigu ay aqbasho ama kaa codsato kiro ka dib waqtiga loogu talagalay inaad guuro waxaa dhici karta inay ka tanaasuleen xaquuqoodii ahayd inay guriga kaa saaraan sabab ah sii joogid.

## Ku Xadgudubka Liisaska (Jabin Liis)

- If the landlord says you violated the lease, waa inay bixiyaan akhbaar khaas ah sidda taariikhda xadgudubka iyo faahfaahino ku saabsan arrinta. Sidoo kale waa inay cadeeyaan in:

  - aad haysato heshiis (lease) afka ah ama mid qoraal ah,
  - aad jabisay heshiiska (lease) iyo in
  - jabinta heshiisku (lease) ay ahayd arrin "weyn" (muhiim).

- Hadii qolada gurigu ay ogyad ku xadgudubka liiska laakiin ay kiro kaa qaadeen adiga ka dib kolka ay taasi dhacday, waxaa dhici karta inay ka tanaasuleen (faraha ka qaadeen) xaquuqoodii ahayd inay guriga kaaga saaraan xadgudubkaa isaga ah. Eeg liiska heshiiska.

- A Qolo guri lahi kaagama saari karto guri hadii ay tahay aarsi sababtu, xataa hadii aad jabiso liiska. Taa macnaheedu waa inay kugu colaadinayaan wax adiga. Tusaale ahaan, hadii qolada gurigu ay xareysato dacwo guri ka saarid ah ka dib kolkii aad u wacday fatashaha amuuro la xiriira hagaajin, waxa aad ku mudici kartaa guri ka saaridu inay aarsi tahay.




- Hadii qof aadan adigu u talin uu kalifay xadgudubka, sharax sababta aadan mas'uulka uga ahayn waxa dahcay. Laakiin xasuusnow, badanaa adiga ayaa mas'uul ka ah waxa ay ilmahaagu ama martidaadu ay sameyso.

- Hadii aad naafo tahay ayna taasi qayb aka ahayd sababta ku xadgudubka liiska, sharax sababta ay naafanimadaadu ugu taxa-luqdo xadgudubka. Waydii xaakimka inuu amro qolada guriga inay sameeyaan "u maciino macquul ah" naafanimadaada ka dibna kiiska la tuuro.

- Hadii ku xadgudubka liisku ay ku timi sabab ah **dagaal qoyska dhexdiisa ah, dabagalid, dagaal labo qof oo is-shukaansanaysa dhex mara ama xoogid galmo** waxaa dhici karta inaan guriga lagaa saarid.

  - **Hadii aad ku nooshahay guryaha kiradooda la kabo**, wac xafiiska adeegyada dhanka sharciyada ee deegaankaaga markiiba! Ka eeg warqada xogta aruursan ee *Xaquuqda Guryaha Kiradooda la Kabo ee Dhibanayaasha Dagaalka Qoyska Dhexdiisa ah dhi bku ka soo gaaro iyo galmada Xoogid ah.*

  - **Hadii aadan ku noolayn guryaha kiradooda la kabo**, qolada guriga aad uga jirtaa sharciyan kaagama saari karaan guriga hadii xadgudubka sababtiisu tahay tacadi. Laakiin Ashtakada qolada gurigu sidoo kale ay qorto xadgudubyo aan u dhicin sababo la xiriira dagaal qoyska

dhexdiisa ah, ama kufsi, dacwadaasi waa ay sii socon, laakiin kaliya uun xadgudubyada kale ee liiska. Ka eeg warqada xogta aruursan ee,
*Dhibanayaasha Dagaal Qoyska Dhex Mara, Qashqashaadda,*
*ama Fal Dambiyeedka La Xiriira Galmoodka: Xaqa Aad U Leedahay In Aad Ka Baxdo Heshiisk a Kirada*.

## Hadii Maxkamada lagaaga Gar helo

- **Hadii aad u malaynayso in maxkamadu ay khalad sameysay,** waxa aad haysataa 15-cisho oo aad ku xareysato racfaan. Hadii garsoore uu go'aanka gaaray, waxaad sidoo kale xaq u leedahay in go'aanka uu dib u eego xaakim, laakiin waa inaad degdeg talaabo u qaado. Waydiiso karaaniga maxkamada foomamka. Hel talo dhanka sharciga ah markiiba.

- **Waa aad waydiisan kartaa maxkamada ilaa iyo7-cisho oo aad ku guurto inay ku siiso.** U sheeg maxkamaad sababta aad ugu baahan tahay 7-cisho. U sheeg hadii ilmo, waayeel ama dad naafo ahi ay guriga kugula nool yihiin adiga. Waa khasab inaad waydiisato waqtigaa si aad u hesho.

- **Qolada gurigu ay hesho Amar (Writ) maxkamadeed.** Qoladu guriga waa inay shariifka ama bilayska waydiisataa in amarkaa ay adiga kuu geeyaan ama ay ku dhajiyaan albaabkaaga. Amarku (Writ) waxa uu adiga ku siin 24-saac oo aad ku guurto. Hadii aadan guurin, qolada gurigu waxa ay ka qaban waqti iyo maalin aad guuri shariifka. Qoladda gurigu waa khasab inay kuu sheegto kolka shariifku uu imanayo. Shariifku waa inuu meesha joogaa si uu u kormeero in alaabtii la xirxiray ayna dhigeen meel guriga dibada ka ah qolada gurigu. Siddoo kale Alaabtaada waxaa la dhigi karaa isla goobta.



  Eeg warqadayada xogta aruursan ee *Dib U Helitaanka Hantidaada Ka Dib Marka Aad Guurto*.

- **Wali waa aad codsan kartaa in lagaa tirtiro mar dambe.** Xataa haddii kiiska maxkamadda aad ku guuldaraysato, wali waa aad heli kartaa in guri ka saarida lagaa tirtiro mar dambe. Waa ay adag tahay in lagaa tirtiro dacwad guri ka saarid ah, hadii kiiska lagaaga guulaysto, laakiin waa suurtagal.

  Kolka aad codsato tirtirid, hubi inaad u sharaxdo xaakimka ama qaadiga sidda guri ka saarida ku jirta diiwaankaagu ay u saameysay noloshaadda. Haddii dacwada guri ka saaridaadu ay 3 sanno ama ka hor ay ahayd, waydiiso maxkamaddu inay kaa tirtirto.

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**